# Iskuduwaha

Qofka shirka diyaarinaaya oo dadka iskugu wacaaya ayaa ka mas'uul ah isku duwidda. Wuxuu noqon karaa qof aad xiriir badan la leedahay ama aad kalsooni ku qabtid. Waydii SIP xaruntaada daryeelka caafimaadka ama meesha aad kala xiriirtid daryeelkaaga caafimaad.

Hawsha iskuduwaha waa inuu hubiyo inaad hesho qorshe shaqsiyadeed la isku duway, SIP, iyo in la daba galo.

Mararka qaar isku duwaha waa xiriiriyahaaga joogtada ah ee daryeelka caafimaadka wuxuuna noqon karaa isku xirka adiga iyo shaqaalaha daryeelka, taageerada iyo xannaano bixiyeyaasha.

Macluumaad dheeri ah kala xiriir degmadaada ama bixiyaha daryeelka caafimaadka

Hawsha

Qofka xiriiriyaha ah

Telefoonka

E-maylka

Region Örebro län

Postadress: Region Örebro län, Box 1613, 701 16 Örebro
E-post: regionen@regionorebrolan.se
Tel: 019-602 10 00, www.regionorebrolan.se



Ku socota qofka haysta daryeelka caafimaadka, taageero iyo xannaano

Region Örebro län

## Qorshaha iskuduwidda shaqsiga, SIP

Waxaa jira fursado qofka u baahan dadaalo dheeri ah ay iskugu duwayaan bixiyeyaash kala duwan ee daryeel caafimaad, taageero iyo xannaano.

Waxaa lagu sameeyaa qorshe shaqsiyadeed oo la isku duway. Qorshaha wuxuu wanaajinaayaa iskuduwida wuxuuna sawir guud siinaayaa adiga, qaraabada ama bixiyaha daryeelka caafimaad. Isla markaana waxaad saameyn ku yeelaneysaa ka qeybqaadashadaada iyo su'aalaha la xiriira xaaladaada.


## Sidaan ayay u shaqeyneey


Adiga ama shaqaalaha, tusaale ahaan ka socda degmada ama gobolka, ayaa bilaabaaya iskuduwidda. Shaqaalahaas ayaa caadiyan mas'uul ka ah iskuduwidda.

si wada jir ah ayaad gogoldhig ugu sameyneysaan isku duwidda aad u baahantahay adiga iyo bixiyeyaasha kala duwan ee daryeelka caafimaadka, taageerada iyo xannaanada. Iskuduwaha ayaa kullan iskugu kiin yeeraaya dhamaantiin.

Siyaabo kala duwan ayaa kulanka loo sameyn karaa si wadajir ah ayaad u go'aansan doontaad sida adiga kugu haboon.

Inta shirka lagu jiro waxaad ka hadleysaan baahiyahaaga iyo yaa sameynaaya waxa ku saabsan daryeelka, taageerada iyo xannaanada.




## Waxaa fiican inaa ka fekerto kulanka ka hor:

- Waxaa u baahan tahay, rabitaanka iyo waxaad naga filaneysid?
- Sidee jeclaan lahayd inay noqoto?
- Maxaa kuugu muhiimsan marka la fiiriyo xaalada hadda siday tahay?

## Oggolaansho

Xog isweydaarsiga ka dhexeeya degma iyo caafimaadka gobolka ee ku saabsan caafimaadkaaga iyo baahiyahaaga waxaa la sameyn karaa oo keliya marka aad adiga bixisid oggolaansho

## Halkaan waxaad ka heleysaa SIPkaaga

Wixii aad kulanka ku heshiisaan waxaa lagu diiwaan gelinaa oo lagu keydinaa SIP kaasoo aad ka aqrisan karto 1177.se cinwaanka ka hooseeya qorshaha caafimaadka

Waxaa kaloo waraaq ahaan SIP laguugu soo diri karaa guriga.